



GMDQS

**GUDDIGA MADAXA BANNAAN EE
DOORASHOYINKA QARANKA IYO SOOHDIMAHA**

Magacaabista Wakiillada & Diiwaangelinta Wakiillada Urur/xisbiyada

Macaabista

A. Wakiillada Ururrada/xisbiyada waa xubnaha ay usoo wakiilanayaan korjoogtaynta goobaha ay kamidyihin: -

1. Xarunta diiwaangelinta codbixiyeyaasha (xilliyada ay socoto)
2. Xarunta cod-bixinta
3. Xarunta tirinta codadka

B. Tallaabooyinka Magacaabista:

1. Xisbiga ama ururka siyaasadeed kasta waa inuu magacaabaa **wakiilada** oo uu si rasmi ah, ugu gudbiyaa GMDQS iyadoo loo marayo habraaca Urur/xisbiga iyo habraacan.
2. Xisbiga waxa uu soo saarayaa **waraaqda magacaabista** ee wakiilka, taas oo ay ku jiraan magaca wakiilka, jagadiisa, iyo meesha uu ka howlgali doono (goobta diiwaan-gelinta ama goobta codbixinta).

C. Shuruudaha Wakiilka

1. Waa in uu yahay xubin oo ka tirsan Urur/xisbiga oo **ay soo magacaabeen** madaxda sare ee xisbiga.
2. Waa in uusan wakiilku lahayn **taariikh dambiyo la xiriira doorashada**.
3. Waa inuu ahaadaa qof:
 - a. Si dhab ah u matalaya Urur/xisbiga.
 - b. Leh karti iyo aqoon aasaasi ah oo ku saabsan hawlaha doorashada.

D. Xuquuqda Wakiillada

Wakiillada Urur/xisbiyada ku matalaya goobaha diiwaangelinta iyo codaynta waxay xaq u leeyihiin in ay: -

1. Geli karaan goobaha diiwaangelinta iyagoo muujinaya kaarkooda.
2. Ka qaybqaataan hubinta tirakoobka agabka goobta (sanduuqa codadka, waraaqaha).
3. Ka qaybqaataan hubinta saxnaashaha habraaca diiwaangelinta
4. Ka qaybqaataan hubinta tirinta codadka codadka ansaxay iyo waraaqa qaldamay ama haraaga ah



5. Qori karaan cabashooyin haddii ay arkaan khalad.

E. Waqtiga Magacaabista

- Xisbiyada/ururada siyaasadeed waa in ay **soo magacaabaan wakiiladooda kahor** maalinta diiwaangelinta ay bilaabanayso una soo gudbiyaan GMDQS.

F. Waxyaabaha laga rabo warqadda urur/xisbiga kusoo magacaabay wakiilka

1. Waxaa lagusoo magacaabayaa warqadda rasmiga ah ee uru/xisbiga
2. Magaca wakiilka oo afaran iyo ID number
3. Magaca Urur/xisbiga uu matalayo
4. Goobta uu ka howlgalayo
5. Caddey wakiilashada ururka

Diiwaangelinta wakiillada

Goobaha Diiwaangelinta

- A. Diiwaangelinta waxaa lagu sameeyaa **xafiisyada GMDQS** ee heer **degmo ama gobol**, iyadoo ay ku xirantahay meesha wakiilku ka howlgelayo.

Dokumentiyada loo baahanyahay:

1. Waraaqda magacaabista ee xisbiga.
2. Aqoonsi shakhsi ah (ID).
3. **Sawir 2x2** ah oo cusub (midab leh).
4. **Foomka Diiwaangelinta Wakiilka** oo ay diyaariyeen GMDQS.

Wakiilladu waa inay u **diiwaangashanyihiin GMDQS** (Xafiisyada degmooyinka/gobolada).

Nidaamka Diiwaangelinta

- A. Marka dokumentiyada la helo, wakiilka waxaa lgu darayaa **diwaanka rasmiga ah** ee wakiillada.
- B. Guddiga Doorashooyinka wuxuu wakiilka siinayaa **Kaarka Aqoonsiga Wakiilka**,

Kaarka Aqoonsiga Wakiilka

- A. GMDQS wuxuu siinayaa **kaar aqoonsi rasmi ah** oo ay ka muuqato:
 1. Magaca wakiilka.
 2. Xisbiga/Ururka uu matalayo.



3. Goobta uu ka hawlgeli doono.
4. Taariikhda uu ka shaqeynayo.

B. Kaarkani waa inuu wataa/sitaa wakiilka goob kasta oo uu gelayo.

Hubinta iyo Xaqiijinta Guddiga Doorashooyinka:

1. **GMDQS** ayaa **hubinaya** xogta iyo dokumentiyada ay kasoo gudbiyeen urur/xisbiyada wakiilladooda si loo xaqiijiyo inay buuxiyeen shuruudaha diiwaangelinta.
2. **GMDQS** wuxuu xaqiijinayaa in **wakiillada** ay ka socdaan Ururada/ xisbiyada iyo in aanay jirin qilaafaad magacaabistooda ah ama khaladaad ku jira dokumentiyada.

Amniga iyo Anshaxa

1. **Wakiillada** waa inay u hoggaansamaan xeerarka iyo habraacyada amniga iyo anshaxa ee goobta diiwaangelinta ama codaynta.
2. Haddii ay jiraan khaladaad ama ku xadgudub xeerarka iyo anshaxa goobta, **GMDQS** wuxuu qaadi karaa tallaabooyin lagama maarmaan u ah goobta, oo ay ka mid noqon karaan:
 - a. ka saarista goobta diiwaan-gelinta ama
 - b. in lagala noqdo kaarka aqoonsiga wakiilka.